**Heshiiska Xalka ah ee u**

**dhexeeya**

**Mareykanka iyo**

**Dugsiyada Dadweynaha**
**Federal Way**

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way ("Degmada"), Waaxda Caddaaladda ee Mareykanka, Qeybta Xuquuqda Madaniga, Qeybta Fursadaha Waxbarasho, iyo Xafiiska Qareenka Mareykanka ee Degmada Galbeedka Washington ("Mareykanka") (guud ahaan isku ah " Dhinacyada”) ayaa si iskood ah u galaya Heshiiskan Xalka ah (“Heshiiska”) si kor loogu qaado kartida ay Degmada u leedahay inay ka hortagto oo si habboon uga fal-celiso dhibaateynta asaagga dhexdooda ah ee ku saleysan asalka qaran iyo diinta iyada oo la raacayo waajibaadka Degmada sida ku cad Qodobka IV ee Sharciga Xuquuqda Rayidka ee 1964, 42 U.S.C. § 2000c iyo waxa soo raaca ("Qodobka IV"), oo u oggolaanaya Waaxda inay wax ka qabato cabashooyinka qaarkood ee ku saabsan takoorka ka jira dugsiyada dadweynaha. Heshiiskani wuxuu sidoo kale ka hadlayaa waajibaadka Degmada sida ku cad Sharciga Fursadaha Waxbarasho ee Siman ee 1974, 20 U.S.C. § 1701 iyo waxa soo raaca ("EEOA"), kaas oo faraya gobollada iyo degmooyinka maamulka dugsiyada "inay qaadaan tallaabada ku habboon si looga gudbo caqabadaha xagga luuqadda ee carqaladeynaya ka-qayb-galka siman ee ardayda [ardeydooda] dhigata barnaamijyada [barnaamijyadooda] waxbarasho," 20 U.S.C. § 1703. Sida ku cad heshiiskan, Degmada waxay qandaraas la qaadan doontaa hal ama in ka badan oo la-taliyayaal madaxabanaan ah ("La-Taliyaha (yaasha)") si ay dib ugu eegto oo ay kaalmo farsamo ugu hesho siyaasadaheeda dhaqamadeeda, iyo hab-raacyadeeda dhibaateynta ku saleysan asalka qaran iyo diinta si loo hubiyo inay is-waafaqsan yihiin oo ay waafaqsan yihiin sharciga Federaalka. Intaas waxaa dheer, Degmada, iyada oo kaashaneysa La-taliyaha (yaasha) Madaxabanaan, waxay dib u eegi doontaa oo wax ka baddeli doontaa tababbarkeeda iyo hirgelinta hab-maamuuska ee ku saabsan siyaasadaha noocan oo kale ah si loo xaqiijo habraacyo joogta ah oo loogu talagalay warbixinta, baaritaanka, iyo ka jawaabidda dhibaataynta asalka qaran iyo diinta ku saleysan, waxayna ka caawin doontaa dugsiyada dhisida awooda loogu hogaansamo siyaasadaha iyo habraacyadaas. Awood-dhisida noocan oo kale ah waxaa ka mid noqon doona tabbabar iyo kobcinta xirfadeed oo heer Degmo ah iyo sidoo kale heer dugsi oo loogu talagalay ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha ee dhammaan dugsiyada Degmooyinka. Degmada waxay sidoo kale dib u eegi doontaa oo wax ka baddeli doontaa siyaasadaheeda, dhaqamadeeda, iyo tabbabaradeeda la xiriira ka gudbida caqabadaha luqadeed ee Limited English Proficient (Aqoonta Ingiriisiga ee Yar) (“LEP”) ee waalidiinta/mas'uuliyiinta ardayda Degmada.

## Qodobada Heshiiska

### I. LA-TALIYAHA (yaasha) MADAXABANAAN

**A.** Degmadu waxay la fulin doontaa Heshiis Is-afgarad ah hal ama in ka badan La-taliyeyaal madaxbanaan ama adeeg bixiyeyaal, oo ay Dhinacyadu ku heshiiyeen, si looga caawiyo hirgelinta Heshiiskan. Gaar ahaan, La-taliyaha (yaashu) waxay u qalmi doonaan inay dib u eegaan oo ay kaalmo farsamo ka siiyaan Degmada siyaasadaha, dhaqamada, habraacyada, tababbarka, iyo borotokoollada hirgelinta ee la xiriira dhibaateynta, cabsi gelinta, ama xoogsheegashada takoorka ah ee ku saleysan asalka qaran iyo diinta ee ardeyda dhexdeeda ah.

### II. DHAQAMADA IYO HAB-RAACYADA LA XIRIIRA DHIBAATEYNTA, CABSI GELINTA, IYO XOOGSHEEGASHADA ARDEYDA DHEXDEEDA

**A.** Iyaga oo la tashanaya Degmada, La-taliyaha (yaashu) waxay dib-u-eegis ku sameyn doonaan dhammaan dhaqamada iyo habraacyada guud ahaan Degmada iyo heer dugsi ee la xiriira dhibaataynta, cabsi gelinta, iyo xoogsheegashada ku saleysan asalka qaran iyo diinta, iyo edbinta ardayga, iyo sidoo kale dhammaan agabyada la xiriira (tusaale, buug-gacmeedyada ardayga iyo shaqaalaha, xeerarka anshaxa, foomamka cabashada) ("agabyada"), si loo hubiyo inay waafaqsan yihiin Siyaasadaha[1] iyo waajibaadka qoran ee Degmada sida ku cad sharciga Federaalka si looga hortaggo, loo baaro, oo wax looga qabto dhibaateynta asalka qaran iyo diinta ku saleysan ee ardayda, iyo in meesha laga saaro jawi kasta oo colaadeed oo ka dhasha ama la xiriira dhibaataynta noocaas ah. La-taliyeyaashu waxay siin doonaan Degmada warbixin qiimeyn ah oo ay ku jiraan isbeddela la soo jeediyay in lagu sameeyo dhaqamada iyo hab-raacyada heer dugsi iyo heer Degmo.

**B.** Iyada oo kaashaneysa taageerada iyo jiheynta La-taliyaha (yaasha), Degmadu waxay qiimeyn dhammaystiran ku sameyn doontaa dhaqaalaheeda heer Degmo iyo heer dugsi si loo ogaado, haddii wax, dhaqaale dheeraad ah loo baahan yahay si looo xaqiijiyo in dhammaan dugsiyadu ay leeyihiin awood ay si buuxda ugu fuliyaan Siyaasadaha Degmada iyo qodobada heshiiskan. Ugu yaraan, Degmadu waxay kulamo dhegeysi ah laqaadan doontaa shaqaalaha Decatur High, Thomas Jefferson High, Valhalla Elementary, Lake Dolloff Elementary, iyo TAF @ Saghalie schools si loo qiimeeyo baahiyaha dhaqaale ee dugsiyadan. Dhaqaalaha noocan ah waxaa ka mid noqon kara tabbabarka shaqaalaha, agabyada fasalka, qoraalo iyo bandhigyo, iyo waxyaabo kale oo lagama maarmaan ah. Ilaa iyo inta ay Degmadu ka go'aamineyso inaysan heysanin dhaqaalaha muhiimka u ah hirgelinta Siyaasadahaas iyo qodobadda Heshiiskan si daacadnimo ku dheehan tahay, waxay raadin doontaa dhaqaalaha ay u baahan tahay waxayna kala shaqeyn doontaa La-taliyaha (yaasha) in la sameeyo qorshe qoraal ah oo lagu helayo

dhaqaalahaas ( "Qorshaha Dhaqaalaha").

---

[1] “Siyaasadaha” waxaa loola jeedaa dhammaan siyaasadaha ay qaadatay Degmadu si wax looga qabto dhibaataynta, cabsi gelinta, iyo xoogsheegashada ku saleysan asalka qaran iyo diinta, iyo edbinta ardayga.

**C.** Markay tahay Febraayo 1, 2021, Degmadu waxay u gudbin doontaa Mareykanka nuqul ka mid ah warbixinta qiimeynta La-Taliyaha (yaasha) iyo Qorshaha Dhaqaalaha ee Degmada.

**D.** Markay tahay Abriil 1, 2021, Degmadu waxay u gudbin doontaa Mareykanka dhammaan wax ka baddelka la soo jeediyey in lagu sameeyo dhaqamadeeda iyo hab-raacyadeeda heer dugsi iyo heer Degmo, oo ay ku jiraan dhammaan waxyaabaha la xiriira. Haddii Degmadu qaadan weydo soo jeedinta La-taliyaaha (yaasha), Degmadu waxay la socodsiin doontaa Mareykanka soo jeedinta taladaas qaaska ah, sababta ay u diidayso, iyo tallaabada kale ee ay degmadu u soo jeedisay taas baddelkeeda.

**E.** Markay tahay May 1, 2021, Mareykanku wuxuu ogeysiin doonaa Degmada oggolaanshahiisa ama faallooyinkiisa ku saabsan wax ka baddelka iyo Qorshaha Dhaqaalaha ee la soo jeediyay.

**F.** Markay tahay Juun 1, 2021, Degmadu waxay u gudbin doontaa Mareykanka wax ka baddelka la soo jeedinayo ee ugu dambeeyay, iyada oo lagu darayo faallooyinka Mareykanka. Haddii Dhinacyadu aysan isla oggolaanin wax kamid ah wax ka baddelka la soo jeediyey, waxay si daacadnimo leh ugu shaqeyn doonaan inay ku xalliyaan wixii khilaaf ah 30 maalmood gudahood.

**G.** Marka la helo oggolaanshaha Mareykanka ee wax ka baddelka la soo jeediyay ee ugu dambeya iyo Qorshaha Dhaqaalaha, Degmadu waxay si dhakhso leh u raadin doontaa oggolaanshaha Qorshaha ee Guddiga Dugsiga. Degmadu waxay si dhakhso leh u wargelin doontaa Mareykanka go'aan kasta oo Guddiga Dugsiga ay ka qaataan Qorshaha.

## III. LA SOCOSHADA IYO DABAGALAKA DHACDOOYINKA IYO CABASHOOYINKA DHIBAATEYNTA, CABSI-GELINTA, IYO U XOOG-SHEEGASHADA

**A.** Degmadu waxay xaqiijin doontaa in dhammaan dhacdooyinka dhibaataynta, cabsi-gelinta, iyo xoogsheegashada (oo ay ku jiraan wixii warbixin qoraal ah ama hadal ah, u gudbinta edbinta, ama cabashada ku lug leh dhibaateynta ama xoogsheegashada suurtagalka ah) loola socdo qaab elektaroonig ah, xitaa iyada oo aan sharci jebin gaar ah la soo diiwaangelinin. Macluumaadka lala socon doono ee ku saabsan

dhacdooyinka noocan oo kale ah waxaa lagu qoray Lifaaqa A.

**B.** Degmadu waxay xaqiijin doontaa in dhammaan shaqaalaha Degmadu, oo ay ku jiraan macallimiinta iyo shaqaalaha, iyo qandaraasleyaasha, ee ka warhela eedeymaha dhibaataynta, cabsi-gelinta, ama xoogsheegashada ay ku wargalin doonaan Isku-duwaha Dugsiga La Magacaabay ee dugsiga (sida lagu qeexay Qaybta V. B.) ama maamulaha kale ee heer dugsi ama heer Degmo ee ku habboon.

## IV. DHAQAMADA IYO HAB-RAACYADA LAGULA XIRIIRO WAALIDIINTA/MAS'UULIYIINTA LEH AQOONTA INGIRIISIGA EE YAR (LEP)

**A.** Si loo ogaado waalidiinta aqoonta Ingiriisiga yar leh (LEP) ee u baahan caawinta luqadda, Degmadu waxay weydiin doontaa waalidiinta/mas'uuliyiinta inay ku cadeeyaan xog uruurinta luuqadda guriga haddii ay u baahan yihiin inay ku helaan isgaarsiinta heer dugsi iyo heer degmo luuqad aan Ingiriisiga ahayn iyada oo loo marayo turjumaano iyo/ama tafsiirayaal. Degmadu waxay u diyaarin doontaa macluumaadka ku saabsan baahida waalidka/mas'uulka aqoonta Ingiriisiga yar leh (LEP) tarjubaano iyo tafsiirayaal ay si fudud u heli karaan maamulayaasha iyo macalimiinta

iyada oo loo marayo nidaamka macluumaadka ardeyga. Degmadu waxay ku tabbabari doontaa shaqaalaheeda inay dib u eegaan macluumaadkan ka hor inta aan la qorsheynin kulamada lala yeelanayo waalidiinta/mas'uuliyiinta ama aan loo dirin ogeysiisyada waalidiinta. Inta lagu jiro tabbabarkan, Degmadu waxay sharaxi doontaa sida loo helo turjubaano aqoon leh iyo turjumaadaaha macluumaadka muhiimka ah ee luuqadaha waaweyn ee aan Ingiriisiga ahayn ee ay ku hadlaan qoysaska ku nool Degmada, gaar ahaan shanta (5) luqadood ee ugu sarreysa iyada oo loo marayo nidaamka macluumaadka ardayga maalinta ugu horreysa sanad dugsiyeed kasta ("Luuqadaha Waaweyn"). Degmadu sidoo kale waxay raacin doontaa bayaan, lagu turjumay Luqadaha Waaweyn, xirmadeeda diiwaangelinta, foomkeeda diiwaangelinta onleenka ah, iyo bogga koowaad ee boggaga intarnetka ee Degmada iyo dugsiga oo ku saabsan helitaanka tarjumaadda luuqado kala duwan iyo sida loo codsado tarjumaan ama qof wax fasira.

**B.** Degmadu waxay oggolaatay inay siiso waalidiinta LEP (aqoonta Ingiriisiga yar leh) macluumaadka dugsiga la xiriira ee la siiyo waalidiinta kale una siiso sida soo socota:

1. Ogeysiisyada ama dukumiintiyada wata macluumaadka muhiimka ahee lagu qeybiyo heer Degmo ama heer dugsi ayaa lagu tarjumi doonaa Luuqadaha Waaweyn ee Degmada waxaana loo qaybin doonaa waalidiinta ku hadla luuqadahaas; dadka kale ee ku hadla luqadaha aan ahayn Luuqadaha Waaweyn ayaa sidoo kale la siin doonaa, waqtiga saxda ah, tarjumaada ama fasiraadaha dukumiintiyada oo ku qoran luuqad ay fahmayaan markay codsadaan ama haddii baahida tarjumaada noocaas ah ay u cadaato Degmada

midkood.

2. Wada-xiriirka afka ee macluumaadka daruuriga ah waxaa lagu bixin doonaa luuqad uu waalidka uu fahmayo iyada oo loo adeegsanayo turjubaan oo aan dib u dhacna lahayn. Degmadu waxay ku bixin doontaa turjumaad afka ah ama tarjumaad qoraal ah macluumaadka kale ee la xiriira dugsiga marka laga codsado macluumaadkaas waalidiinta/mas'uuliyiinta aqoonta Ingiriisiga yar leh LEP markasta oo la codsado macquulna ay tahay.

---

[2] "Macluumaadka daruuriga ah" waxaa kamid ah, balse aan ku ekeyn: (a) kaararka warbixinta iyo warbixinada kale ee horusocodka tacliinta; (b) dukumiintiyada khuseeya xulashooyinka tacliinta iyo qorsheynta; (c) dukumiintiyada khuseeya qaabilaada ama diiwaangelinta; (d) dukumiintiyada khuseeya nidaamyada baaritaanka ee dalbanaya asalka luuqada ardayga iyo luqadda uu waalidku jecel yahay inuu dadka kula xiriiro;
(e) Codsiyada ogolaanshaha waalidka ee ka qeybgalka ardayda ee barnaamijyada iyo hawlaha ay maalgeliso Degmada/dugsigu; (f) agabyada iyo ogeysiisyada loo qaybiyo ardayda ee wata macluumaadka ku saabsan hawlaha dugsiga iyo Degmada kuwaas oo ogaysiis u baahan si looga qeybgalo howlahaas (tusaale, imtixaanada, hawlaha manhajka ka baxsan ee u baahan codsiga, shirarka waalidka iyo macalinka, guryaha banaan); (g) macluumaadka ku saabsan arrimaha waxbarashada gaarka ah ee ka dhasha sida ku cad Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah ("IDEA") ama Qaybta 504 ee Sharciga Dhaqancelinta ee 1973 "Qaybta 504") (tusaale, xuquuqda habraaca, shirarka ku saabsan Qorshayaasha Waxbarsho ee Shakhsiyeed ("IEPs") iyo Qorshayaasha Qeybta 504, iyo Qorshayaasha Wax-kaqabashada Dhaqanka); (h) macluumaadka ku saabsan edbinta ardayda; (i) buugaagta gacanta ee waalidka; (j) macluumaadka la xiriira caafimaadka iyo amniga dadweynaha iyo dugsiyada Degmada; iyo (k) macluumaad kasta oo kale oo qoran oo qeexaya xuquuqaha/waajibaadyada saaran waalidiinta ama ardayda iyo dheefaha/adeegyada ay heli karaan waalidiinta iyo ardayda, oo ay ku jiraan siyaasadaha Degmada ee ku saabsan dhibaateynta, cabsi-gelinta, iyo xoogsheegashada takoorka ah.

[3] Degmadu waxay ogolaatay inay ku fidiso waajibaadkan turjumaada macluumaadka daruuriga ah bogga intarnetka ee Degmada.

C. Dhamaan turjubaanada ay bixiso degmadu ama dugsiga, ha ahaadaan shaqaalaha mushaharka qaata ee Degmada, qandaraasleyaasha, ama is-xilqaamayaal, waxay noqon doonaan: kuwo laba luuqad ku hadla oo si muuqata aqoon iyo karti ugu leh inay wax turjumaan; kuwa loo tabbabaray bixinta turjumaada laga codsaday inay bixiyaan ama aqoon buuxda u leh labada luuqadood eraybixin kasta oo gaar ah oo loo baahan yahay si loogu bixiyo tarjumaadda la codsaday si sax ah; iyo kuwo loo tabbabaray anshaxa tarjumaadda (tusaale ahaan, baahida loo qabo saxsanaanta iyo sirta ahaanshaha tarjumaadda). Marka laga reebo xaaladaha degdegga ah, Degmadu uma isticmaali doonto ardayda, qoyska, ama saaxiibbada waalidiinta/mas'uuliyiinta LEP (aqoonta Ingiriisiga yar leh), ama Google Translate si ay u fasiraan dukumiintiyada Degmada ama dugsiga ka soo baxay ee wata macluumaadka muhiimka ah. Haddii ay jirto xaalad degdeg ah oo aan wax turjumaan ah la heli karin, hadii ay tahay qof ahaan ama khadka Luuqada ama adeeg lamid ah oo meel fog laga bixiyo, Degmadu waxay sii dabagali doontaa waalidka/mas'uulka waqtiga ku habboon si ay ugu gudbiso, iyada oo adeegsaneysa turjubaan aqoon leh,

macluumaadka muhiimka ah ee qoyska ama asxaabta ay afka ku turjumeen.

**D.** Degmadu waxay xaqiijin doontaa in xafiiska weyn ee dugsi kasta uu si cad oo muuqata u soo dhajiyo ogeysiis ku qoran Ingiriis iyo Luuqadaha Waaweyn oo ku saabsan xuquuqda ay waalidiintu/mas'uuliyiintu u leeyihiin inay codsadaan adeegyada tarjumaadda iyo fasiraada. Isla ogaysiiskan ayaa sidoo kale si muuqata loogu soo dhejin doonaa bogga intarnetka ee Degmada waxaana lagu dari doonaa dhammaan buug-gacmeedyada ardayga iyo/ama waalidka/mas'uulka.

**E.** Si loo hubiyo in dhamaan dugsiyada Degmadu ay helaan macluumaadka horey loo turjumay, Degmadu waxay siin doontaa xafiiska dhexe iyo shaqaalaha dugsiga jooga meel ay qaab elektaroonig ah uga heli karaan liiska alaabada saxda ah ee waqti xaadirkan ee dukumiintiyada la turjumay ee heer Degmo iyo kuwa dugsi gaar u ah, iyo sidoo kale tilmaamo lagu codsado tarjumaadaha dukumiintiyada dheeraadka ah. Degmadu waxay sii wadi doontaa inay ballaariso liiskan alaabada si loogu daro dhammaan fasiraadaha macluumaadka muhiimka ah ee heer degmo iyo heer dugsi ee ku fasiran Luuqadaha Waweyn. Si looga caawiyo dhamaan dugsiyada inay la xiriraan waalidiinta/mas'uuliyiinta LEP, Degmadu waxay siin doontaa maamulayaasha dugsiyada liiska magacyada, luuqadaha, iyo macluumaadka xiriirka dhamaan shaqaalaha Degmada, qandaraasleyda, iyo kuwa kale ee bixiya adeegyada fasiraada iyo turjumaada. Siyaasadaha iyo hab-raacyada ku saabsan helitaanka adeegyada fasiraada iyo tarjumaadda waxaa lagu dari doonaa tabbabarka sanadlaha ah ee Degmada ee loo qabto maamulayaasha iyo macallimiinta.

## V. LA SOCOSHADA DEGMADA

**A.** Agaasimaha Guud ee Degmada ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada ayaa mas'uul ka noqon doona hubinta inay Degmada u hoggaansanaato Heshiiskan iyo sharciyada xuquuqda madaniga ee Federaalka ee la isticmaali karo. Agaasimaha Guud ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada ayaa kormeeri doona u hogaansanaanta Heshiiskan; iskuduwi doona warbixinnada ay Degmada u soo gudbineyso Mareykanka; xaqiijin doona joogteynta dhammaan siyaasadaha iyo tabbabarada heer degmo iyo heer dugsi, iyo agabyada la xiriira ee ku saabsan dhibaateynta, cabsi-gelinta, iyo takoorka xoogsheegashada ah, iyo xiriirka lala sameeyo waalidiinta/mas'uuliyiinta LEP; siin doona oo shaaca ka qaadi doona macluumaadka la cusbooneysiiyey qaab ku saleysan xilliyo go'an dhammaan maamuleyaasha, macalimiinta, kulliyada, shaqaalaha, ardayda, iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta ee ku saabsan siyaasadaha Degmada iyo waxyaabaha la xiriira; oo xaqiijin doona in dhammaan agabka dadweynaha ay yihiin kuwi ugu danbeeyay.

**B.** Dugsi kasta oo ku yaal Degmada, shaqaale la magaacabay ("Isku-duwaha Dugsiga La Magacaabay") ayaa ahaan doona qofka xudunta u ah xiriirada, iskuna dubbaridi baarista iyo ka jawaab-celinta heerka dugsiga ee, dhammaan dhacdooyinka iyo/ama

cabashooyinka dhibaateynta, cabsi-gelinta, iyo takoorka xoogsheegashada ah. Shaqaale kasta oo noocaas ah wuxuu mas'uul ka noqon doonaa inuu xaqiijiyo in laga bixiyo jawaab-celin deg-deg ah, wax ku ool ah, oo ku habboon dhammaan dhacdooyinka ama cabashooyinka noocaas oo kale ah iyo inuu hubiyo in dhacdo kasta si habboon loogu xareeyo keyd-xogeedka elektiroonigga ah ee Degmada.

**C.** Isku-duwaha Dugsiga La Magacaabay ee dugsiyada Decatur High, Thomas Jefferson High, Valhalla Elementary, Lake Dolloff Elementary, iyo TAF @ Saghalie schools wuxuu siin doonaa warbixinno qoraal ah saddexdii biloodba mar Agaasimaha Guud ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada oo qeexaya dhammaan dhacdooyinka iyo/ama cabashooyinka soo gaaray dugsiga ee ku saabsan isku xoogsheegashada iyo dhibaataynta, iyo sharraxaadda jawaab-celinta dugsiga ee dhacdo kasta ama cabasho kasta oo noocaas oo kale ah.

**D.** Agaasimaha Guud ee Shaqaada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada wuxuu dib u eegis ku sameyn doonaa dhammaan warbixinnada saddex-biloodlaha ah iyo dhammaan baaritaannada iyo xalka heer dugsiyeedka ah ee anshaxa ardayga oo laga yaabo inay noqdo dhibaateyn si loo xaqiijiyo u hogaansanaanta dugsiyada Decatur High, Thomas Jefferson High, Valhalla Elementary, Lake Dolloff Elementary, iyo TAF @ Saghalie schools ee siyaasadaha iyo nidaamyada la socoshada iyo dabagalka Degmada iyo in la hubiyo in dugsiga uu uga jawaab-celiyay si deg deg ah, wax ku ool ah, iyo hab ku haboon dhamaan dhacdooyinka iyo/ama cabashooyinka xoogsheegashada, dhibaataynta, ama takoorka. Warbixinta sanadlaha ah ee ay u dirto Mareykanka, ka eeg farqada VIII.A, Degmadu waxay si kooban u bixin doontaa natiijooyinka ka soo baxay dib u eegistaan, oo ay ku jirto sharaxaadda dhammaan tallaabooyinka dabagalka ah ee ay qaaday Degmadu si ay wax uga qabato dhibaatooyinka ama walaacyada lala kulmay inta lagu jiray hawsha dib u eegista.

## VI. TABBABARKA IYO KOBCINTA XIRFADA

**A.** Iyada oo la kaashanaysa La-Taliyaha (yaasha), Degmadu waxay wax ka baddeli doontaa dhammaan barnaamijyada tababarka iyo agabyada la xiriira dhibaataynta, cabsi-gelinta, iyo takoorka xoogsheegashada ah si loogu daro dhammaan wax ka baddelada siyaasadaha Degmada ee lagu sameeyay iyada oo la raacayo Heshiiskan.

**B.** La-taliyaha (yaasha) waxay qiimeyn doonaan dhaqamada iyo baahiyaha tabbabarka ee horay u jiray ee Agaasimaha Guud ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada wuxuuna kala shaqeyn doonaa Degmada inay bixiso tabbabaro gooni ah oo gaar ah si loo hubiyo in Agaasimaha Guud ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada uu leeyahay aqoonta iyo xirfadda lagama maarmaanka u ah fulinta dhammaan waajibaadka tabbabarka iyo kormeerka ee la xiriira hirgelinta siyaasadaha Degmada iyo shuruudaha Heshiiskan.

**C.** Agaasimaha Guud ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada ayaa u qaban

doona ama u qabanqaabin doona tabbabar sanadle ah shaqaalaha cusub iyo tabbabar waqti ka waqti ah shaqaalaha hadda shaqeeyo si loo hubiyo in dhammaan shaqaalaha Degmada ay la socdaan siyaasadaha Degmada iyo sharciyada khuseeya. Tabbabarka waxaa ku jiri doona cadeynta hadii shaqaalaha dugsiga ay ku guul darraystaan inay si dhakhso leh, wax ku ool ah, oo ku habboon uga jawaab-celin waayaan dhacdooyinka iyo/ama cabashooyinka dhibaataynta, cabsi-gelinta, iyo xoogsheegashada takoorka ah, oo ay ku jirto inay wargeliyaan maamulayaasha wixii dhacdooyin ama cabashooyin noocaas ah, inay jebineyso siyaasadda Degmada iyo qodobadda Heshiiskan, iyo sidoo kale sharciyada Federaalka iyo/ama gobolka. Tabbabarka wuxuu sidoo kale caddayn doona siyaasadaha iyo habraacyada habboon ee lagula xiriiro waalidiinta/mas'uuliyiinta LEP ah iyadoo la raacayo qodobadda Heshiiskan, iyo sidoo kale sharciyada Federaalka. Tabbabarka la siinayo shaqaalaha hadda shaqeeyo waxaa ka mid noqon doona fursad ay shaqaaluhu ku weydiiyaan su'aalo isla markaana ay kula wadaagaan walaacyada iyo caqabadaha ka jira fulinta siyaasadaha Degmada. Agaasimaha Guud ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada ayaa siin doona Kormeeraha Guud warbixin kooban oo ku saabsan walaacyada iyo caqabadaha lagu soo gudbiyay tabbabarka shaqaalaha, Degmaduna waxay ka shaqeyn doontaa inay wax ka qabato arrimaha noocaas ah iyada oo loo marayo hagitaan iyo tabbabar dheeraad ah, sida ugu habboon.

**D.** Iyada oo la kaashaneysa La-taliyaha (yaasha). Degmadu waxay siin doontaa tabbabar gooni ah maamulayaasha iyo Isku-duwayaasha Dugsiga La Magacaabay ee heer dugsi iyo heer Degmo oo ku saabsan sida ugu habboon ee loo qaabbilo, loo diiwaangeliyo, looga shaqeeyo, waxna looga qabto cabashooyinka dhibaateynta, cabsi-gelinta, iyo xoogsheegashada takoorka ah si loo hubiyo aqoontooda iyo xirfaddooda la xiriirta qaabbilaada cabashooyinka iyo hababka baaritaanka ee habboon. Tabbabarkan waxaa ka mid noqon doona fursad loo siin doono shaqaalaha inay ku soo gudbiyaan jawaabtooda ku aadan caqabadaha hadda ka dhex jira hirgelinta siyaasadaha Degmada ee dhibaateynta, cabsi-gelinta, iyo xoogsheegashada. Tabbabarka waxaa sidoo kale lagaga hadli doona walaacyada Mareykanka uu ka muujiyay sida ay Degmada uga falceliso dhacdooyinka dhibaataynta, cabsi gelinta, iyo xoogsheegashada ku saleysan asalka qaran iyo diinta. Haddii midkood Mareykanka, La-taliyaha (yaasha), ama Degmadu uu dalbado kulan si looga wada hadlo walaacyada uu Mareykanka ku soo ogaaday baaritaankiisa iyo/ama u hoggaansamida Heshiiskan, kulanka noocas oo kale ah waxaa la qaban doonaa waqti la isla wada oggol yahay.

**E.** Degmadu waxay siin doontaa dhammaan ardayda Degmada tilmaamo da' ahaan ku habboon oo ku saabsan dhibaataynta kana hadlaya nooca anshaxa ay mamnuucday siyaasadda Degmada iyo hababka lagu soo wargeliyo shaqaalaha dugsiga dhacdooyinka dhibaataynta, cabsi-gelinta, iyo xoogsheegashada takoorka ah.

**F.** Laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2021-22, dhammaan tabbabarada la faray qaybtan waxaa lagu qaban doonaa qaab sanadle ah, ka hor Diseembar 30-keeda sannad dugsiyeed kasta muddada uu shaqeenayo Heshiiskan, waxaana hoggaamin doona

shaqsiyaad ku filan oo aqoon leh sida uu go'aamiyo La-Taliyaha(yaasha).

## VII. WARBIXINTA XOG URUURINTA RA'YIGA SHAQALAHA IYO QIIMAYNTA WAXTARKA

**A.** Degmadu waxay kala shaqeyn doontaa La-taliyaha (yaasha) sidii loo diyaarin lahaa loona qaadi lahaa sanadkiiba labo xog uruurinta ra'yiga shaqalaha ah si loo qiimeeyo jiritaanka iyo saameynta dhibaataynta, cabsi-gelinta, iyo xoogsheegashada takoorka ah, isku-keenida iyo amniga jawiga waxbarasho, iyo waxtarka tallaabooyinka la qaaday iyadoo la raacayo Heshiiskan. Xog uruurinta koowaad waxaa laga qaadi doonaa ardayda Degmada, tan labaadna waxaa laga qaadi doonaa waalidiinta/mas'uuliyiinta ardayda Degmada. Degmadu waxay xaqiijin doontaa in xog uruurinta labaad ay gaarto waalidiinta/mas'uuliyiinta LEP ah (aqoonta Ingiriisiga yar leh), iyada oo loo marayo adeegyada fasiraada iyo/ama tarjumaadda. Xog uruurinta waxaa loo buuxin karaa si qarsoodi ah. Mareykanku wuxuu fursad u heli doonaa inuu dib u eego oo uu jawaab ka bixiyo labada xog uruurin ka hor inta aan la isticmaalin.

**B.** Laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2021-22, xog uruurinta ardayga iyo waalidka labaduba waxaa la qaban doonaa kahor Diseembar 30-keeda sanad dugsiyeed kasta inta lagu jiro muddada Heshiiskan oo dhan. Xog uruurinta waa in la diyaariyo iyada oo lala kaashanayo La-taliyaha (yaasha). Degmadu waxay u gudbin doontaa Mareykanka xog uruurinta oo qabyo qoraal ah si ay dib ugu eegaan waxna ugu biiriyaan ugu yaraan 60 maalmood kahor inta la qeybinin xog uruurinta. Agaasimaha Guud ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada iyo Isku-duwaha Dugsiga La Magacaabayee dugsi kasta ayaa falanqeyn doona natiijooyinka xog uruurinta waxayna ku dari doonaan falanqeyntan Warbixinta Qiimeynta Waxtarka ee Degmada ee sanadlaha ah, ee lagu sharaxay cutubka VII.C. Haddii midkood Degmada, Mareykanka, iyo/ama La-taliyaha (yaasha) uu go'aamiyo in loo baahan yahay tabbabar ku saabsan sida loo falanqeeyo natiijooyinka xog uruurinta, Degmadu waxay u qaban doontaa tabbabarka noocaas ah shaqaalaha ay khuseyso.

**C.** Dhamaadka sanad dugsiyeed kasta (laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2020-21), Degmadu waxay qiimeyn ku sameyn doontaa waxtarka dadaaladeeda kahortagga dhibaataynta. Qiimeynta waxaa sameyn doona Agaasimaha Guud ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada. Warbixinta ugu dambeysa oo qoraal ah ayaa la raacin doonaa shey'yada ku jira Lifaaqa B, waxaana lagu dari doonaa warbixinta sanadlaha ah ee Degmada ay u gudbiso Mareykanka, iyada oo la raacayo cutubka VIII.A iyo Lifaaqa C.

## VIII. LA SOCOSHADA IYO WARBIXINTA

**A.** Inta lagu jiro mudada Heshiiskan, Degmadu waxay u soo gudbin doontaa

Mareykanka warbixin sanadle ah ugu dambayn Luulyo 15-keeda oo wadata macluumaadka ku jira Lifaaqa C, iyada oo warbixinta ugu horreysa la sugayo July 15, 2021. Degmadu waxay, inta heshiiskan uu socdo, keydin doontaa oo ilaalin doontaa dhammaan diiwaannada iyo dukumiintiyada, oo ay ku jiraan dhammaan macluumaadka lagu keydiyay qaabka elektaroonigga ah, ee loo isticmaalay in laga diyaariyo warbixinta sanadlaha ah, iyo dhammaan dukumiintiyada kale ee la xiriira u hoggaansamideeda Heshiiska, waxayna siin doontaa macluumaadka noocan ah Mareykanka markii laga codsado.

**B.** Mareykanku wuxuu si deg deg ah qoraal ahaan ugu wargalin doonaa Degmada dhammaan arrimaha ama walaacyada la xiriira u hoggaansamida Heshiiskan ee soo bixi kara inta lagu jiro muddada

Heshiiskan uu socdo. Dhinacyadu waxay si daacadnimo ku jirto uga shaqeyn doonaan inay xalliyaan arrimaha ama walaacyada noocaas ah. Haddii ay dhacdo in Degmada ay jabiso Heshiiskan oo aan lagu xallin karin wadahadal niyad wanaag ah, Mareykanka wuxuu bilaabi karaa dacwad dhageysi maxkamadeed si loo dhaqangeliyo Cutubka IV, EEOA, iyo ballanqaadyada iyo waajibaadka gaarka ah ee Degmada ee ku xusan Heshiiskan. Heshiiskan kama fududeyn doona Degmada waajibaadyadeeda kale sida ku xusan sharciyada kale ee xuquuqda madaniga ee Federaalka. Mareykanku wuxuu xaq usii leeyahay inuu baaro iyo, hadii ay haboon tahay, inuu furo dacwad dhageysi amar fulin ah oo ku saabsan wixii xadgudubka sharciga Federaalka ah ee Degmada lagu soo dacweeyo mustaqbalka.

**C.** Isaga oo kormeeraya dadaalada Degmada ay ku fulineyso waajibaadkeeda ku xusan Heshiiskan, Mareykanka wuxuu sameyn karaa goob booqasho, wuxuu kormeeri karaa tabbabarada, wuxuu wareysi la yeelan karaa shaqaalaha Degmada iyo ardayda (iyada oo waalidku u oggol yahay), wuxuu wadahadal la yeelan karaa La-taliyaha (yaasha), wuxuuna codsan karaa wixii macluumaad ama xog dheeraad ah ee lagama maarmaan u ah Mareykanka inuu ogaado in Degmadu ay fulisay qodobadda Heshiiskan.

## IX. SHURUUDAHA IYO JOOJINTA

**A.** Heshiiskan wuxuu shaqeyn doonaa illaa iyo 60 maalmood kadib marka ay Degmada soo gudbiso warbixinteeda oo dhameystiran Luulyo 15, 2023. Dhinacyada heshiiskan, iyaga oo heshiis qoraal ah wada galaya, waxay wax ka beddeli karaan Heshiiskan Xalka ah si wax looga qabto xaaladaha isbeddelay.

Taariikhda: Noofembar 12, 2020

BRIAN T. MORAN
Xeer-ilaaliyaha Mareykanka
Western District of Washington

CHRISTINA FOGG
Ku Xigeenka Xeer-ilaaliyaha Mareykanka
Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Mareykanka
Western District of Washington
700 Stewart Street, Suite 5220
Seattle, WA 98101-1271
(206) 553-7970

ERIC S. DREIBAND
Ku Xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud
GREGORY B. FRIEL
Kusii Xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud

SHAHEENA SIMONS, Chief
FRANZ R. MARSHALL, Deputy Chief
ARIA S. VAUGHAN
PETER W. BEAUCHAMP
Qareenada Maxkamada
Qaybta Fursadaha Waxbarasho
Qeybta Xuquuqaha Madaniga
Waaxda Caddaaladda ee Mareykanka
950 Pennsylvania Avenue, NW — 4CON
Washington, DC 20530
(202) 616-2166
at ia.vaiiuhan!‹fiisdoi .co

*Xeer-ilaaliyaasha Mareykanka*

Waxaa loogu talagalay
Dugsiyada Dadweynaha
Federal Way:

Dr. Tannin Campbe11, Kormeeraha Guud

## LIFAAQA A

## DHACDOOYINKA IYO CABASHOOYINKA DHIBAATEYNTA, CABSI-GELINTA, IYO U XOOG-SHEEGASHADA
–
## MACLUUMAADKA AY TAHAY IN LALA SOCDO

1. Magaca, fasalka, dugsiga, isirka, asalka qaran, jinsiga, diinta, iyo/ama naafonimada, iyo macluumaadka kale habboon ee la xiriira ardayga (ardayda) la bartilmaameedsaday;
2. Qofka (dadka) soo wargelinaya dhacdada (haddii uu ka duwan yahay ardayga la bartilmaameedsaday);
3. Ardayga (ardayda) ku lug leh ama lagu eedeeyay inuu ku lug leeyahay anshax xumada dhibaateynta ama xoogsheegashada;
4. Dhammaan markhaatiyaasha dhacdada la soo sheegay ee la yaqaano;
5. Tilmaanta hadii ardayga (ardayda) la bartilmaameedsaday marar hore la bartilmaameedsaday;
6. Tilmaanta hadii ardayga (ardayda) la eedeeyay la rumeesan yahay inuu u xoogsheegtay ama dhibaateeyay ardayga (ardayda) la bartilmaamsaday ama arday kale marar hore;
7. Taariikhda la soo wargeliyay ama taariikhda markii ugu horreysay ay Degmadu ogaatay dhacdada;
8. Faahfaahinta gaar ah ee ku saabsan taariikhda, waqtiga, qaabka, nuxurka, iyo goobta ay wax ka dhaceen, oo ay ku jiraan dhammaan dukumintiyada taageeraya;
9. Taariikhda (aha) ardayda ku lugta leh ama goobjoogga u ahaa dhacdada la wareystay iyo magaca (magacyada) shaqaalaha (shaqaalayaasha) sameeyay wareysiga (yada);
10. Soo koobida ku saabsan natiijooyinka sarkaalka baaritaanka sameenaya, oo ay ku jiraan haddii dhibaataynta, cabsi-gelinta, ama xoogsheegashada ay ku saleysneyd koox si gaar ah loo ilaaliyo, iyo waxa lagu saleeyay natiijooyinkaas;
11. Go'aaminta Degmada ee ah in dhacdada ay raad leedahay ama ay tahay mid aan sal iyo raad lahayn; iyo
12. Soo koobida falcelinta Degmada ay ka sameesay dhacdada, oo ay ku jiraan talaabooyin kasta oo badbaado oo ku meel gaar ah oo la hirgaliyay inta xal looga helayo warbixinta.

## LIFAAQA B

## SHEY'YADA KU JIRA WARBIXINTA QIIMEYNTA WAXTARKA EE SANADLAHA AH

1. Dib u eegis lagu sameeyay xogta laga helo xog uruurinta ra'yiga shaqalaha dugsiga iyo natiijooyinka iyo talaabooyinka ay qaaday Degmadu iyada oo ka jawaabeysa natiijooyinkaas;
2. Dib u eegis lagu sameeyo dhammaan warbixinnada dhibaataynta, cabsi-gelinta, iyo xoogsheegashada iyo jawaab-celinta heer Degmo iyo dugsi;
3. Go'aaminta in dhacdooyinka la soo sheegay ee dhibaataynta ay kordheen ama yaraadeen tira iyo culeys ahaan, guud ahaan iyo kooxda gaarka loo ilaaliyo;
4. Qiimeyn ku saabsan inta jeer iyo ilaa iyo inta dhacdooyinka dhibaataynta la baaray oo wax laga qabtay iyada oo la tixraacayo siyaasadda Degmada;
5. Faahfaahinta meelaha u baahan in la saxo iyo/ama dhaqaale dheerad ah;
6. Talooyinka sare loogu qaadayo siyaasadaha iyo dhaqamada looga hortago dhibaataynta ee Degmada, iyo waqtiyada lagu fulinayo talooyinka noocaas ah;
7. Soo koobida natiijooyinka xog uruurinta luuqada guriga ee sanad dugsiyeedki hore la sameeyay; iyo
8. Talooyinka sare loogu qaadayo siyaasadaha iyo dhaqamada Degmada ee sida saxda ah ee loola xiriirayo waalidiinta/mas'uuliyiinta LEP ah, iyo waqtiyada lagu fulinayo talooyinka noocaas ah.

## LIFAAQA D

## SHEY'YADA LA RAACINAYO WARBIXINTA SANADLAHA AH

1. Nuqulada dhammaan warbixinnada dhacdooyinka, gudbinta edbinta, iyo cabashooyinka ee Decatur High, Thomas Jefferson High, Valhalla Elementary, Lake Dolloff Elementary, iyo TAF @ Saghalie schools ee la xiriira xoogsheegashada ama dhibaataynta, iyo dhammaan dukumintiyada la xiriira dhacdooyinka noocaas ah (tusaale, qoraallada wareysiyada, waraaqaha lala wadaago waalidiinta/ mas'uuliyiinta, bayaanada natiijooyinka iyo talaabooyinka xalka ah, diiwaanada la xiriira dhacdooyinka hore ee dhibaataynta ee ku lugta leh isla ardayga (ardayda);
2. Sida lagu sharaxay cutubka III.A., diiwaanka la socoshada oo qoraya dhammaan dhacdooyinka dhibaataynta, cabsi-gelinta, iyo xoogsheegashada, oo ay ku jiraan dhammaan macluumaadka la faahfaahiyay iyo Lifaaqa A;
3. Sida lagu sharaxay cutubka V.D, qoraal kooban oo ku saabsan natiijooyinka Degmada ee dib u eegista ay ku sameysay warbixinada seddexdii biloodba mar la qoro ee dugsiyada Decatur High, Thomas Jefferson High, Valhalla Elementary, Lake Dolloff Elementary, iyo TAF @ Saghalie schools ee loo gudbiyo Agaasimaha Guud ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada, oo ay la socoto faahfaahinta dhammaan talaabooyinka dabagalka ah ee ay qaaday Degmadu si wax looga qabto wixii dhibaato ama walaac ah ee lala kulmo inta lagu jiro hawsha dib u eegista;
4. Warbixinta Qiimeynta Waxtarka sanadlaha ah ee Degmada sida ay qabaan cutubka VII.C iyo Lifaaqa B;
5. Soo koobida kulan kasta oo tabbabar ah oo la qabtay iyada oo la raacayo Qaybta VI, oo ay ku jirto taariikhda iyo muddada kulan kasta oo tababar ah, ajandaha iyo wixii agab ah ee loo qaybiyey ama la adeegsaday intii tabbabarka uu socday, magaca iyo jagada qof kaste oo ka qeybgalay, iyo magaca iyo jagada qof kasta kasta oo looga baahnaa inuu ka qeybqaato tabbabarka balse aan soo xaadirin (oo ay la socoto taariikhda qof kasta oo noocaas ah uu qaatay ama la filayo inuu qaato tabbabarka);
6. Cadeynta Agaasimaha Guud ee Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Xiriirka Bulshada ee ah in, iyada oo la raacayo cutubka V.D, isaga ama iyadu ay dib u eegeen dhammaan baaritaannada iyo xalka heer dugsiyeedka ee anshaxa ardayga oo laga yaabo inuu noqdo dhibaateyn, cabsi-gelin, ama xoogsheegasho takoor ah si loo xaqiijiyo u hogaansanaanta siyaasadda Degmada , Heshiiskan, iyo sharciga Federaalka;
7. Liiska shaqaalaha Degmada, qandaraaslayaasha, iyo kuwa kale ee bixiya adeegyada tarjumaadda iyo fasiraada;
8. Liiska dukumintiyada heer degmo iyo kuwa dugsi gaar u ah ee la tarjumay iyada oo loo qorayo qaab ah cinwaanka dukumintiga iyo luqadaha lagu turjumay, iyo, sanad walba intaa ka dib, liiska dukumiintiyada noocaas ah oo la cusbooneysiiyay; iyo
9. Cusbooneysiinta ama wax ka baddelka lagu sameeyo dukumiinti kasta, siyaasado kasta, ama macluumaad kale oo horey loo bixiyay lana xiriira Heshiiskan.